Guddiga ardayga oo codad muhiim ah u keenay Machadka Hoggaaminta

Macallimiinta furi kara dareenka xoogan ee ardayda. Tilmaamaha isku diyaarinta mustaqbal aan la garaneyn. Qiyaasaha fasalka yar. Aqoonsiga nolosha ardayda ee ka baxsan dugsiga. Iyo bun lacag la'aan ah.

Kuwani waxay ahaayeen qaar ka mid ah talo-bixintii ay Khamiistii bixiyeen shan xubnood oo ka mid ah guddiga hadda iyo guddigii hore ee Dugsiyada Dadweynaha Portland intii lagu guda jiray kulan hal saacadood socday oo lagu soo bandhigay bilow dhiirigelin leh oo ku aadan Maalinta 2aad ee Machadka Hoggaanka PPS ee ka dhacay Dugsiga Sare ee Roosevelt.

Iyada ay goobta joogeen dhageystayaal ah hoggaamiyayaasha PPS kaasi oo ka dhacay masraxa Roosevelt, xubnaha guddiga waxay dadka la wadaageen sheekooyinka taariikhdooda kala duwan iyo sida ay saameyn ugu yeelatay sida ay wax u arkaan iyo dareenka ay ka qabaan waxbarashada.

Akili Kelekele, oo sanadkii u dambeeyay dhigta Dugsiga Sare ee Lincoln High, ayaa ka hadlay muhiimada ay leedahay in macallimiinta ay isku xirnaan adag la yeeshaan ardayda, si ay uga caawiyaan in ay gaaraan hamigooda si ay u noqdaan xubno awood leh iyo wax soo saar leh oo bulshada ka tirsan.

"Macalimiintu waxay runtii daboolka ka qaadaan dareenkan xoogan ee ardayda," ayuu sheegay.

Guddiga ayaa soo bandhigay kooxo kala duwan oo codad ah, oo uu ku jiro Akili, oo ah xubin firfircoon oo ka tirsan Ururka Ardayda Madow ee Lincoln iyo ururada Brothers of Color isla markaana noqon doona qof madaxtinimada fasalka la wadaaga qof kale. Waxaa ku soo biiray arday ay wada dhigtaan Lincoln oo ah Hilario Gonzalez, oo ah oo arday sanadkii labaad dhigta isla markaana ah suxufi soo shaax baxaya oo doonaya in uu sheego sheekooyinka dadka u sheegaan iyada oo la adeegsanayo macno badan, iyo arday kale oo sanadkii labaad dhigta, Eilish Koch, oo meel uu ku niyadsam yahay ka helay ee Isbahaysiga Dadka leh Jinsiga Aan Kala Soocnayn Caadiga ah ee Roosevelt.

Sidoo kale guddiga waxaa ku jiray laba ardayda oo ka qalin-jabisay PPS oo ah Cody Sullivan, oo 2014-kii ka qalin-jabiyay Dugsiga Sare ee Grant, oo sanadkan noqday qofkii u horreeyay oo Oregon ka tirsan ee qaba Cudurka Lagu Dhasho oo ka qalin-jabiya kulliyad afar sano ah (Concordia); iyo Ana Wu, oo 2015-kii ka qalin jabisay Dugsiga Sare ee Franklin High oo ku dhalatay China isla markaana ku noolaan jirtay Mexico ka hor intii aanay u soo guurin Portland sanadkii 2008-kii, markaasi oo aysan ku hadli karayn Ingiriisi.

Iyada oo uu kala hagayay Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero, oo ahaa xiriiriyaha hadalka, xubnaha ka tirsan guddigu waxay ka hadleen waxay ka wada hadleen taariikhaha sheegaya wax walba oo ku saabsan khibradooda waxbarasho.

Ana, tusaale ahaan, waxay ka hadashay caqabada la xiriiray imaanshaha PPS iyada oo isku dayaysay in ay barato Af Ingiriisiga iyo kalsoonida ay ka heshay shaqaalaha dugsiga, oo uu ka mid yahay maamulaha Marysville oo iyada soo dhaweeyay maalinteedii koowaad, iyo macallinka ESL oo loolan iyada ku geliyay in ay ku dhegto wax qorista.

Saameynta macallimiintu ku yeesheen nolosha Ana wuxuu ahaa mid aad u xoogan, waxay isqortay barnaamijka macallimiinta laba luqadood ku hadal ee ka jira Gobolka Portland, oo ah dadaalka wada shaqayneed oo lala leeyahay PPS si loo xoojiyo liiska degmada ee macallimiinta labada luqadood ku hadasha.

“Waxaan runtii rabaa inaan dhiirigeliyo ardayda, laga yaabo in ay luqadooda koowaad ahayn Ingiriisi,” ayay sheegtay Ana. “Waxaan rajeynayaa inaan bedeli karo nolosha ardayga.”

Aniga oo ah arday isku aqoonsan in aan ahay qof leh jinsi aan kala soocnayn, Eilish waxay ka walwalsan tahay waxa dugsiga sare u ekaan doono. Waxay kalsooni ka heshay Isbahaysiga Dadka leh Jinsiga Aan Kala Soocnayn Caadiga ah ee Roosevelt, iyada oo la siinayo qol ay ku dareemi karto ammaan iyo taageero inta ay ku jirto sanadka hore ee dugsiga.

“Toddobaad kasta, waxaan aadi karayay qolkaasi aniga oo og in aanu jirin wax kale jacayl maahane,” ayay sheegtay. “Waxay runtii ahayd waayo-aragnimo wanaagsan.”

Hilario wuxuu dadka la wadaagay waayo-aragnimadiisa ah soo dhigashada Dugsiga Hoose ee Ainsworth iyo Dugsiga Dhexe ee West Sylvan ka hor Lincoln iyo ahaanshaha mid ka mid ah dadka yar oo wejigoodu midabka maariinka ah lahaa ‘brown’ ee fasalka. “Ma jiro kala duwanaansho sidaa u badan, iskumana arko inaan haba yareetee ka muuqdo fasallayda,” ayuu sheegay.

Laakiin intii hore, Hilario wuxuu awooday in uu helo codkiisa, oo uu ka mid yahay fursad uu ku qoray qoraal la soo geliyay OregonLive. Waxuu ka hadlay sida ay muhiimada ugu lahayd in macallimiinta ka caawiyaan ardayda inay ogaadaan isla markaana horumariyaan waxyaabaha ay daneeyaan.

“Ogaanshaha waxyaalaha aad u qabto dareenka xoogan waa mid muhiim ah,” ayuu sheegay. “Waxay u diyaarin karaan ardayga kaliya ma aha waxa uu rabo in uu sameeyo, ee laakiin sidoo kale waxay u diyaarin karaan waxa laga yaabo inay la kulmaan mustaqbalka.”

Cody wuxuu dadka la wadaagay fasalada iyo hawlaha kala duwan ee uu naftiisa ku dhex daray, oo ay ka mid yihiin ciyaaraha, kooxda heesaha iyo horumarinta xiisaha aadka ah ee uu u qabo fasallada taariikhda ah ee Dagaalka Sokeeya. Cashar muhiim ah oo uu bartay: “Marnaba ha rajo dhigin,” ayuu sheegay.

Kormeeraha Guud Guerrero ayaa guddiyada ka codsaday hadalkii gunaanadka, iyada oo Eilish ay ku dartay hadal miisaan leh iyada oo tilmaantay in jirarka dhallinyarada ah ee loo dhisay si ay u koraan ay daalaan waqti dambe, iyada oo soo jeedisay in waqti dambe la bilaabo maalmaha dugsiga. Waxay tilmaantay in ay qorshaha ugu jirto inay noqoto qof bunka cabta ilaa iyo inta ay ka weynaaneyso, laakiinse ay tahay in ay bilowda caadada cabida bunka inta ay ku jirto sanadka hore ee dugsiga.

“Waa in aynu helnaa bun lacag la’aan ah!” ayay sheegtay.

Kulanka waxaa lagu bixiyay nooc kale duwan oo wax toosin ah, mid loogu talagalay in macallimiinta PPS inay mar waliba dhageystaan ardayda ay wax baraan. Dani Ledezma, oo ah La taliyaha Gaarka ah ee PPS ee cusub ee la shaqaaleysiiyay ee Kormeeraha Guud u qaabilsan Sinnaanta iyo Cadaaladda Bulshada, ayaa soo gebagebaysay hadalka hore ee guddiga:

“Xirfadlayaal ka shaqeynaya waxbarashada ahaan, waxaan ognahay inaan ugu fiicanahay marka aan dhageysano codadka ardayga, dhageysanayo aragtida ardayga.”